# Su'aalaha Inta Badan La Iska waydiiyo Abaalmarinada Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhaawac Maskax ahaaneed (FAQs)

Iyadoo la adeegsanayo xeerka Fair Start for Kids Act (FSKA) (Senate Bill 5237), the Department of Children, Youth, and Families (DCYF) waxay u qaybisaa Abaalmarin Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhaawac Maskax ahaaneed oo la siiyo daryeel bixiyeyaasha u qalma ee dhamaystirka waxbarashada iyo tababarka waxbarasho dhaawac maskax ahaaneed ee DCYF aqoonsan tahay.

**Su'aal. Waa maxay habraaca codsiga daryeel bixiyayaasha iyo tababarayaasha si ay u helaan Abaalmarinta Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhaawaca Maskax ahaaneed?**

Jawaab. Ma laha habraac codsasho abaalmarintani. Daryeel bixiyeyaasha shakhsi ahaaneed waxay u baahan yihiin inay hubiyaan in tababarka u qalma lagu diiwaan geliyay MERIT (Managed Education and Registry Information Tool) iyo in shaqadooda la hubiyo ama lagu xaqiijiyo MERIT (Managed Education and Registry Information Tool). Child Care Aware of Washington (CCA of WA) ayaa la xiriiri doonta daryeel bixiyeyaasha si ay u helaan abaalmarin. Hubi inaad eegto iimaylkaga, xitaa iimaylada been-abuurka ah, xiriir ay kusoo direen Child Care Aware of Washington (CCA of WA), kaas oo ku weydiin doona inaad bixiso macluumaad si aad lacag u hesho.[1]

**Su'aal. Halkee ayaan ka heli karaa tababar u qalma Abaalmarinta Maaliyadeed ee Daryeel Xog-ogaalnimo ee Dhaawaca Maskax ahaaneed?**

Jawaab. Isticmaal aalada raadinta "Find Training" (Raadi Tababar) " ee Agabka Maareynta Waxbarashada iyo Diiwaangelinta Xogta (Managed Education and Registry Information Tool, MERIT) ee ikhtiyaarada la ansixiyay. Hubi in tabobarka liistada ku jira uu sheegayo in ay u qalanto abaalmarinta FSKA.

**Su'aal. Maxaa dhacaya haddii aan qayb kamid ah tababarka sameeyo laakiin aanan dhamaynin? Ma ku laaban karaa oo ma dhamaystiri karaa, mise ma bilaabi karaa tababar ka duwan?**

Jawaab. Waa inaad dhameysatirtaa tababarka si aad ugu qalanto abaal-marin.

---

[1] Tababarayaasha Early Achievers waa in tababarkooda iyo waxbarashadooda lagu diiwaangeliyo MERIT ilaa xaqiijin kale ay ka ogolaato DCYF, laakiin uma baahna inay ka ciyaaraan door firfircoon. DCYF waxay la shaqayn doontaa barnaamijyada ruqsada shahaado haysta iyo ECEAP kuwaas oo ruqsada laga dhaafay, dugsiyada degmada ama barnaamijyada maalin dugsiyeedka si loo xaqiijiyo diiwaanada abaal-marinaha u qalma.

**Su'aal. Miyaan qaadan karaa laba fursadood oo tababar ah si aan u helo abaal-marin labadaba?**
Jawaab. Haa, waxa laga yaabaa in aad hesho Abaalmarin Maaliyadeed ee Daryeel Xog-ogaalnimo ee Dhaawac Maskax ahaaneed oo tababarro kasta oo u qalma, laakiin fadlan ogow in qadarka ugu badan ee Abaalmarinnada Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhaawac Maskax ahaaneed ee la helay laga yaabo in aanay ka badnaan $1,200.

**Su'aal. Miyaan u baahanahay Lambarka Maamulaha Gobolka oo dhan si aan u helo Abaalmarin Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhaawac Maskax ahaaneed?**
Jawaab. Lambarka Maamulaha Gobolka oo dhan ayaa loo baahan yahay oo kaliya haddii daryeel bixiyaha uu u qalmo abaalmarinta waxbarasho. Uma baahnid Lambarka Maamulaha Gobolka oo dhan si aad u hesho mid kamid ah abaal-marinnada kale ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhaawac Maskax ahaaneed.

**Su'aal. Sidee ayay DCYF u go'aamisay tababarada lagu aqoonsanayo abaal-marinaha maaliyadeed?**
Jawaab. DCYF, kooxda habaynta ee daryeel bixiyaha, iyo Kooxda La-talinta Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhaawac Maskax ahaaneed ee FSKA, oo ka kooban khubaro ku xeel-dheer mawduucan, ayaa aqoonsaday fursadaha tababar ee lagu aqoonsanayo abaal-marin maaliyadeed. Fursadaha tababarkan ayaa lagu doortay iyadoo ay u sabab tahay awooda ay u leeyihiin fikrado iyo mabaadi'da dhaawac xog-ogaalnimo ee muhimka ah.

**Su'aal. Sidee ayaan ku ogaan karaa haddii tababarku u qalmo Abaalmarinta Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhaawac Maskax ahaaneed?**
Jawaab. Dhammaan tababarka ama waxbarashada la ansixiyay waa in lagu diwaangeliyaa MERIT, Diiwaanka Shaqaalaha DCYF, oo ay bixiyaan hay'ad tababar oo qandaraas la gashay DCYF iyo tababaraha gobolka DCYF ay ansixisay.

**Su'aal. Ma heli karaa abaalmarino tababarkii hore?**
Jawaab. Shakhsiyaadka waa in ay dalbadaan abaal-marintooda waxbarashada daryeel xog-ogaalnimo ee dhaawac maskax ahaaneed iyo abaal-marinaha tababarka hal sano gudahiis kadib la dhameeyo tababarka uu u qalmay. Abaalmarinta tababbarka la dhameeyey kahor Janaayo 1, 2023 waa in la dalbadaa Juun 30, 2024.

**Su'aal. Abaalmarinada ma canshuur ayaa ka go'aysa?**
Jawaab. Haa, dhamaan Abaalmarinada Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhaawac Maskax ahaaneed waa la canshuuraa. Su'aalaha iyo taageerada ku saabsan mawduucan, waxaad la xiriiri kartaa xafiiska gobalkaaga ee Child Care Aware of Washington (CCA of WA).

**Su'aal. Ka waran haddii aan horaan u helay abaal-marinta dhiirigalinta ee qaadashada tababarka? Midan mid dheeraad ah miyay u noqon doontaa?**
Jawaab. Abaal-marinaha Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhaawac Maskax ahaaneed kama badan karo $1,200.

**Su'aal.  Waxaan u shaqeeyaa barnaamijka daryeelka ilmaha kaas oo u furan carruurta qaata kaalmada (horaan uga diwaangashanaa) laakiin aan hada u adeegin ilmo ku jiro kaalmo. Miyaan u qalmaa inaan helo abaal-marin?**
Jawaab. Haddii barnaamijkaagu uu dalbaday kaabitaanka lacag bixin ugu yaraan hal bil oo kamid ah 12

bilood ee la soo dhaafay kahor taariikhda abaalmarinta, waxa laga yaabaa inaad u qalanto abaal-marin. Wixii macluumaad dheeraad ah ee sida loo dalbado lacag bixin, fadlan ka eeg: https://www.dcyf.wa.gov/services/ssps.

**Su'aal. Intee in le'eg ayaa maalgelin loo heli karaa Abaalmarinnada Maaliyadeed ee Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhaawaca Maskax ahaaneed?**

Jawaab. Gobolku wuxuu bixiyay $3.2 milyan oo loogu talagalay Abaalmarinta Maaliyadeed ee Daryeelka Xog ogaalnimo ee Dhaawaca Maskax ahaaneed labadan sanoo, taas oo macnaheedu yahay in $1.6 milyan helayo sanad maaliyadeedkan gobolka kasta (Luuliyo 1 - Juun 30).

**Su'aal. Goorma ayaan helayaa abaal-marintayda?**

Jawaab. DCYF iyo ururkaaga tababarku waxay u baahan yihiin wakhti ay ku dhamaystiraan oo ay kaga shaqeeyaan abaal-marinaha, si aad u filan karto inaad ku hesho abaalmarintaada sadex bilood gudahooda laga bilaabo wakhtiga aad dhamaysatay tababarka aad u qalantay.

**Su'aal. Maxaan sameeyaa haddii aan dhameeyo tababbarka daryeelka xog-ogaalnimo dhaawacyada maskax ahaaneed, oo aanan helin Abaalmarinta Maaliyadeed ee Daryeelka xog-ogaalnimo dhaawacyada maskax ahaaneed?**

Jawaab. Kala xiriir MERIT merit@dcyf.wa.gov si aad wax uga waydiiso Abaal-marinada Maaliyadeed ee Daryeelka Dhaawaca maskax ahaaneed.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo websaytka Daryeelka Xog-ogaalnimo ee Dhaawaca maskax ahaaneed DCYF.